

**OGGOLAANSHO GUUD**  
(GENERAL CONSENT – SOMALI)

**Oggolaanshaha Daaweynta**

Waxaan oggolahay oo aan idan ku siinayaa dhakhaatiirta, kalkaaliyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee caafimaadka ee Children's Minnesota (Children's) in ay ilmahayga u sameeyaan baarista caafimaadka, daaweyn, baarista xanuun-helidda, sii-gudbin iyo gaadiidka ay shaqaaluhu go'aamiyaan ee hadba loogu baahdo caafimaad ahaan. Waxaan ogahay in ay ku jiraan khataro daaweyn kasta iyo hawlaha caafimaadka oo waxaan fahamsanahay in uusan jirin qof dammaanad ka qaadi kara sida ay noqon doonaan daaweynta iyo hawlaha caafimaadka. Children's waa isbitaal wax lagu barto. Dhakhtarka weyn, kalkaaliyeyaasha, iyo shaqaalaha kale ee caafimaadka, ee wada qabanaya daryeelka ayaa qaarkood ku jira tababar. Shaqaalaha la tababarayo waxaa hagaya shaqaale leysan haysta iyo dhakhaatiir. Inkasta oo Children's laga helo adeegyo caafimaad oo aad u kala duwan, qaar ka mid ah shaqaalaha daaweynta waxay noqon karaan shaqaale aan ahayn kuwa Children's. Haddii aan su'aalo ka qabo in aysan shaqaaluhu ahayn kuwa Children's, waan weydiin karaa. Waxa aan sidoo kale fahamsanahay in ay Children's ku talin karaan dhakhtar gaar ah, balse go'aanka dhakhtarka ugu dambeyn aniga ayaa iska leh.

**Oggolaanshaha Isticmaalka iyo Wadaagista Macluumaadka Bukaanka**

Waxaan oggolahay in daaweyn awgeed Children's meelo kale ula sii wadaagi karo macluumaadkeyga caafimaadka, lacagbixinta, hawlaha daryeelka caafimaadka, ujeeddooyinka lagu sharxay Ogeysiiska Children's ee Adeegsiga Macluumaadka iyo sida uu sharcigu oggol yahay ama loogu baahdo. Waxaa feyka ilmaha lala sii wadaagi karaa shakhsiyaad gaar ah oo ku lug leh daryeelka, dhaakhaatiirta meelo kale, qorsheyaasha caafimaadka iyo shirkadaha ceymiska, daawada lagu gudbinayo kamybuutarka iyo farmashiyaha, iyo meelo kale oo la shaqeyaa. Children's waxay qaadi karaan sawir iyo/ama fiidiyow inta uu socdo daryeelka caafimaadka oo sawirrada/fiidiyowga waxaa loo isticmaali karaa daryeelka caafimaadkaaga, hagaajinta habraaca, iyo waxbarashada caafimaadka. Intaas waxaa sii dheer, waxaan oggolahay oo aan idan Intaas waxaa sii dheer, waxaan oggolahay oo aan idan siinayaa shaqaalaha aan ahayn Children's ee ka imaanaya meelaha kale iyo shirkadda ceymiska in macluumaadka caafimaadka Children's loola sii wadaago ujeeddooyinka kor ku qoran sida goobaha caafimaadka isku dhafan ama meelaha la xisaabtama daryeelka Children's Minnesota.

**Wadaagista Macluumaadka ee Ujeeddooyinka Cilmibaarista**

Waxaan oggolahay oo aan idan ku bixinayaa in cilmibaaris cilmiiyeed lagu sii wadaago macluumaadka caafimaadkeyga. Diidmada ah macluumaadka feylka caafimaadka ee ujeedka cilmibaarista waxa ku calaamadsan "X" qeybtaas oo dhan.

**Caddeynta Manaafacaadka/Lacagbixinta Adeegyada**

Waxaan oggolahay oo aan codsanayaa in toos loo bixiyo lacagta Children's ee adeegyada ay noogu qabteen goobtan ama goobo kale oo ay leeyihiin ama ay ku shaqeystaan Children's, sida dhakhaatiir kale. Waxaan ogahay in waalidka laga qaadayo lacagta qaarkeed marka loo sameeyo dareylka qeybta aysan bixineyn ceymiska, qorshaha caafimaadka, ama dowladda. Waxaan ogahay in aan isbitaalka Children's kala hadli karo sidaan u bixin karo daryeelkeyga. Waxaa ka mid ah raadsashada kharash kasta oo noqda baaqi. Haddii aan haysto wax ka badan hal ceymis, isbitaalka Children's dib ayuu u celinayaa lacagta dheeraadka noqota. Haddii la iga bixin waayo lacagta Children's, wixii kharash ah waxaa lagu darayaa lacagta la igu leeyahay. Haddii ay jirto lacag ka soo hareysa marka la bixiyo kharashka, waa la ii soo celinayaa.

**Isticmaalka Xuquuqaha Shakhsiiyeed ee Bukaanka**

Xuquuqaha adiga iyo qoyskaaga waxaa lagu dhejiyey goobaha muhiimka ah ee Children's Minnesota. Saxiixaagu waa xaqiijin ah in aad heshay Ogeysiiska Xuquuqaha Shakhsiiyeed.

**Macluumaadka Medicare/Tricare**

Marka ay i khuseyso, waxaan oggolahay helista waraaqaha:  Farriinta Medicare  Farriinta Tricare

Saxiixayga macnahiisu waa in aan akhristay oo aan fahmay macluumaadka halkan ku qoran. Oggolaanshaha daaweynta wuxuu soconayaa hal sano laga bilaabo taariikhda saxiixa. Oggolaanshaha kale ee halkan ku jira waxa uu socon doonaa ilaa lagu joojiyo qoraal ahaan.

Magaca Ilmaha: \_\_\_\_\_

Taariikhda: \_\_\_\_\_

Saxiixa Waalidka: \_\_\_\_\_

Far Waaweyn Magaca Waalidka: \_\_\_\_\_

Waxaad u Tahay Ilmaha: \_\_\_\_\_

Magaca Turjubaanka (haddii loo yeeray): \_\_\_\_\_

Oggolaansho ah taleefanka oo la maqashiiyey (magaca/taariikhda/xilka): \_\_\_\_\_



PLACE PATIENT LABEL HERE